

Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Maaddaama aaney sugneyn cuntada ay heleyso, iyo iyada oo qayb ka ah dib u eegidda istiraatiijiyadda, ayaa WFP Somalia ay bilowdey in ay laasho taageeradii ay siineysey barnaamijyada Quudinta ee 12 Xarumood oo kuwa Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka ah oo ku yaalla gobollada Shabeellaha Hoose, Baay iyo Bakool. WFP waxa ay mudnaan siineysaa waxqabadyada nafaha lagu badbaadinayo sida barnaamijyada quudinta dheeriga ah ee la beegsado (TSFP). Bartamaha Soomaaliya, ayaa WFP ay ku soo af-jareysaa cunto-qaybintii Barnaamijyada Quudinta Guud ee Dheeriga ah (BSFP), sidii horeba loo qorsheeyey ka hor inta aan loo wareegin Barnaamijyada Quudinta Dheeriga ah ee La Beegsado (TSFP). Cunto-qaybintii ugu dambeysey ee Barnaamijyada Quudinta Guud ee Dheeriga ah (BSFP) oo ahayd 1,172 metrik ton (Galley iyo Soya isku shiidan, saliidda cuntada iyo sokor) oo lagu beegsaneyey 135,134 carruur ay da'doodu ka yar tahay shan jir oo ku nool gobollada dhexe ee Soomaaliya (in ka badan 90 boqolkiiba waa carruur ka yar 6-59 bilood) ayaa hadda socota. U wareegidda Barnaamijyada Quudinta Dheeriga ah ee La Beegsado ayaa ay u badan tahay in ay dib ugu dhacdo sababo la xiriiira xaaladda ammaanka ee hadda jirta iyo suurtagalnimada in cuntadu ay kala go'do.

Qiimaha badeecooyinka ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan bariiska iyo massagada ayaa hoos u dhacay celcelis ah 44 boqolkiiba ilaa bishii Maarso ee 2008da, arrintaas ayaa loo saarin karaa in ay keentey qiimaha cuntada ee dunida oo hoos u dhacay, cuntada gargaarka ah ee la geeyo iyo dalagga 2009ka ka soo go'ay qaybo ka mid ah koonfurta Soomaaliya oo wanaagsanaa. Sida ay sheegtey Warbixintii "Price Watch" ee ay 9kii Sebtembar soo saartey Shabakadda Nidaamka Ka Sii Digista Abaarta (FEWSNET), Soomaaliya waa dalka keliya ee Bariga Afrika ku yaalla ee qiimaha dhammaan badeecooyinka ay ka hoos mareen kii sanadkii hore. Haseyeeshee, in kasta oo qiimaha badeecooyinka ee Soomaaliya ay hoos u dhacayaan, haddana qiimaha nolosha ee dalka ayaa weli sarreysa. Warbixinta FEWSNET waxa ay sheegeysaa in muddada u dhexeysa bilaha Agoosto iyo Disembar, ay haqab-beel la'aanta cuntadu ay sii xumaaneyso gaar ahaan saboolka ku nool magaalooyinka gobollada ay abaartu saameysey ee Hiiraan, Galgaduud, Mudug, Nugaal, Sool, Sanaag, iyo Togdheer. Dakhliga iyo ilaha cuntada ee qoysaska saboolka ah ee magaalooyinka gobollada ayaa si weyn loola xiriiyaa suuqyada iyo ganacsiga xoolaha, oo ay abaartu si ba'an u saameysey.

Weeraro tiro badan oo toddobaadkan lagu qaadey Xarumaha Dowladda ee Muqdisho ayaa ay ku dhinteen in ka badan 50 qof ayna ku dhaawacmeen ugu yaraan 80 kale. Sida ay qabto Hay'adda Elman ee Xuquuqda Aadanaha ee xarunteedu tahay Muqdisho, muqaawamada iyo ciidamada dowladduba waxa weeraro ka fuliyaan goobaha la deggan yahay.

6dii Sebtembar, ayaa maamulka Puntland uu soo saarey wareegto uu ku amrayo qiyaastii 1,100 qoys (6,600 oo qof) in ay banneeyaan laba degsiimo oo ay deggan yihiin Dadka Gudaha Ku Barokacay iyo bulshada degaanka oo ku yaalla magaalada Gaalkacyo, gobolka Mudug. Dadka Gudaha ku Barokacay waxaa la siiyey ilaa 13ka Sebtembar in ay kaga guuraan, in kasta oo aaney weli caddeyn in maamulku uu wareegtadaa fulin doono. Wadahawlgalayaasha dhinaca Ilaalinta ayaa arrintan maamulka kagala tashanaya Gaalkacyo iyo Nayroobiba.

Waxqabadka

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 368 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah u qaybiyey 28,074 (17,088 dheddig ah iyo 10,986 lab ah) ka-faa'iideystayaal oo hoos imaanayey Barnaamijka Quudinta Dheeriga ah ee degmooyin kala duwan oo ku yaalla gobollada Bakool, Baay iy Gedo ee Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya. Puntland, Waqooyiga Bari ee Soomaaliya, ayaa WFP iyo la-hawlgalaha ay iskaashadaan ee SERDO, ay ku dhowaad 50 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah u qaybiyeen 2,052 ka-faa'iideystayaal hoos imaanayey Barnaamij "Cunto-shaqo-ku-beddelesho ah" oo laga fuliyey degaanka Qawlo ee Degmada Taleex ee gobolka Sool.

Hay'adda *World Vision International* ee xafiiskeedu yahay magaalada Bu'aale ee gobolka Jubbada Dhexe, ayaa dayactireysa laba biyo-xireen oo ku yaalla tuulada Hargaanty waxaana ay sidoo kale hawl koloriin ku darid ah ka waddaa siddeed tuulo oo kale oo ay abaartu saameysey.

WAWA, oo ah Dallad haweenku ku midoobeen oo ka dhisan Bosaaso, Puntland, ayaa 10,600 haween Gudaha Ku Barokacay ah ku diiwaan geliyey 23 degsiimo si ay uga faa'iideystaan wejiga hore ee qaybinta agabka caafidhowrka. Agabkaan ayaa muhiim u ahaan doona in la gaaro fayadhowr iyo nadaafad wanaagsan oo ay helaan qoysaska saboolka ah ee jilicsan ee ku nool degsiimooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org

